

Ross Procedure

Qalliinka Ross

Dhuunta sare ee soocelinta dhiigga

Halbowlaha Dhiigga ee Weyn (ee u gudba Jirka)

Halbowlaha sambabka midig
(ee gala sambabka)

Right ventricle to pulmonary artery Ccnduit
(Qalbacca Midig ilaa marinka halbowlaha sambabka ama
RV-PA)

Farameynta Sambabka Wax Jirka Looga
Goynayo (daboolka cusub ee halbowlaha)

Halbowlaha Sambabka bidix
(ee gala sambabka)

Xididdada sambabka Midig
(ee ka soo baxa sambabka)

Xididdada Sambabka bidix
(ee ka soo baxa sambabka)

Halbowlaha dhiigga midigta wadnaha


Halbowlaha dhiigga bidixda
wadnaha

Dhuunta hoose ee soocelinta dhiigga

Halbowlaha dhiigga urukujirta
(ee u gudba Jirka)

Lub Plawv Li Ib Txwm

Ogeysiis:



The Children's Heart Clinic, 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404

612-813-8800 * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825

Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404

Qallinka Ross (Farameynta Sambabka Wax Jirka Looga Goynayo)

Ross Procedure

Qallinka Ross waxaa lagu beddelaa daboolka halbowlaha weyn ee dhuubta, ama ciriirka noqda. Qallinkan waxaa badanaa la sameeyaa marka uu daboolka halbowlaha aad u weyn Yahay oo uusan le'ekkeyn halbowlahii asalka ahay ee ilmuu ku dhashay. Marka la sameynayo qallinkan, daboolka halbowlaha ciriirka ah waxaa lagu beddelayaa mid laga soo goynayo sambabka ilmaha iyo marinka right ventricle to pulmonary artery (qalbaca midig ee halbowlaha sambabada ama RV-PA) waxaa loo isticmaalayaa si loogu beddelo daboolk sambabka ilmaha. Waxaa jira waxyaabo badan oo loo isticmaalo marinka RV-PA. Wuxuu ay ku xiran tahay qorshaha qallinka iyo qaabka, marinnada waxaa laga sameynaya Gore-tex®(Gore), wax laga soo gooyo jirka ilmaha (wax laga keenay noole ah aadane), Marinnada Contegra® (Medtronic) (xididka (sac) muruqa xawlmariidka), ama marinnada Hancock® (Medtronic) (tuubada Dacron oo u eg qaansiir (doofaar) muruqiis) ayaa la isticmaalayaa.

Furista bartanka shafka (jeexid ah qeybta dhexe ee shafka) ayaa la sameynaya iyadoo la marayo jeexid ah qallin hore, haddii uu jiro. Waxaa ilmaha yar lagu xirayaa wadne iyo sambab macmal ah (mashiin ah wadne-sambab). Halbowlaha wadnaha waa la furayaa oo waxaa laga soo saarayaa dabool liifad ah. Haddii ay qorshaha qallinka qeyb ka tahay, jeexitaan ayaa la samayn karaa si loo weyneeyo halbowlaha hoostiisa daboollka. Halbowleyaasha xalmariidka ayaa laga goynayaa halbowle leh xuub "batoon" oo kale u eg. Daboolka sambabka ee qeyb ahaan ugu wareegsan, ama "jirkiisa qeyb laga gooyey," ayaa lagu beerayaa. Qalitaanka sambabada ayaa markaa lagu tolayaa booska halbowlaha weyn. Godadku ayaa laga soo goynayaa dhinaca qeyb jirkiisa ka mid ah, oo batoonka xididka wadnaha ayaa lagu tolayaa meesha saxda ah. Halbowlaha kor u socda ayaa markas qeybta jirka ah lagu dhejinayaa sambabka, si loo dhammeystiro wuxuu cusub ee loo sameeyey halbowlaha dhiigga ee weyn. Waxaa la soo xulayaa marin cabbir RV-PA sax ah oo ku habboon. Tuubada hal dhinac ayaa laga tolayaa meesha laga jeexay halbowlaha sambabka oo kan kalena waxaa lagu tolayaa meesha laga jeexay ee qalbaca midig.

Hawlgalka Caadiga ah ee Qallinka Ka-dib:

- Wakhtiguu Qaadanooyinka: 5 saac
- Qalabka Tuubooyinka: Badanaa ilmaha waxaa lagu soo celinayaa Xarunta Daryelka Wadnaha ka dib qallinka oo waxaa lagu xirayaa tuubo ah neefsashada, mid halbowle oo lagula soconayo cadaadiska dhiigga, mid kale oo ah xididdada (oo faleebbe laga qaato ama dhiig laga qaado), faleebbe bannaanka ah, tuubooyinka xabadka Foley oo dheecaanka looga daadinayo, iyo xargaha hagaajinta oo meelgaar ah.
- Soo-kabashada Caadiga ah Qallinka Ka-Dib: Tuubada neefsashada ayaa badanaa laga saarayaa 24 saac ka dib qallinka. Tuubada halbowlaha badanaa waxaa laga saarayaa maalmo ka dib, marka laga joojiyo faleebba. Tuubada xididada bartamaha waxaa laga bixinayaa marka laga joojiyo ee aan loo baahneyn daawada iyo dhiigga laga qaadayo faleebba ama IV. Tuubooyinka xabadka waxaa laga saaraa 24 ilaa 48 saac ka dib qallinka, markuu yaraado dheecaanka soo baxaya. Waxay ku xiran tahay nooca qulqulka dhiigga ee qorshaha qallinka, oo ilmaha waxaa loo qorayaa aspirin wakhti muddo ah qallinka ka dib.
- Muddada Seexinta Isbitaalka: Wuxuu ilmuu isbitaalka joogayaa badanaa 6 maalmood ka dib marka la marsiyo qallinka Ross.

Qaadashada Daawooyinka Guriga: Carruurto waxa ay u baahan karaan hal daawo ama in ka badan in ay qallinka Ross guriga u qaataan sida:

- Daawada biyaha saarta (Lasix) si looga xakameeyo dareeraha
- Daawada dhiigga jilcisa (Aspirin) looga hortagi karo xinjirowga
- Antibiyootigga bakteeriyyada ilkhaa ayaa loo qori karaa.